




# Gawracatada

Xaashida xaqiiqada



Gawracatada waa cudur ay keento bakteeriyada *Corynebacterium diphtheriae* taasoo dhaliso sun (mariid).



Waa la kala qaadaa, badanaa waxaa la iskugu gudbiyaa qufaca ama hindhisada. Marar dhif ah, dadku waxay ku xanuunsadaan taabashada dareeraha nabarrada furan ee ay keentay gawracatada.

## Astaamaha iyo Calaamadaha



Daciifnimo



Dhuun Xanuun



Cunto-xumo



Qandho Yar

Dahaar dhegdheg leh oo cad ama cawl ah ayaa ka samaysma qumanka, cunaha, ama sanko. Calaamadaha kale waxaa ka mid ah xabeeb, qufac wah-layn ah, iyo finan maqaarka ah. Cudurka oo daran ayaa laga yaabaa inuu yeesho barar qoorta ah, garaac wadno oo aan caadi ahayn, ama dareen la'aansho jireed.

Calaamaduhu waxay badanaa soo baxaan 2-7 maalmood kadib marka bakteeriyadu jirka gasho, laakiin waxay sidoo kale noqon kartaa ilaa 10 maalmood kadib.

## Kahortagga

In aad tallaaf qaadato waa habka ugu wanaagsan ee looga hortago gawracatada.



## Wixii Macluumaad Dheeraad Ah



Kala xiriir dhakhtarkaaga ama Xarunta Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada ee Maine 1-800-821-5821 wixii macluumaad dheeraad ah.

Waxaad sidoo kale booqan kartaa [www.cdc.gov/diphtheria](http://www.cdc.gov/diphtheria).